



SUGNAANTA DHAQAALAH

Sugnaanta dhaqaalaha wuxuu ku saabsanyahay soo celinta hab-nololeedyada dhibbanyaasha colaada hubeysan iyadoo la deegsanaayo hab labadaba ay yihiin kuwa waara sharaftooduna ku ixtiraamantahay.

SOOMAALIYA: 60,000 QOF OO SAAMEYSAY ABAAR AYAA HELAY RAASHI



©ICRC

Dadka deeganka oo raashin ka qaadanaaya xarun raashin qeybin oo ku taalo Xolxol, Gobolka Sool, Soomaaliya.

Nayroobi (ICRC)- Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRC) iyo Ururka Bisha ee Soomaaliyeed waxay hadda bariis, digir iyo badar u qeybinaayaan ku dhowaad 60,000 qof oo waxyelo ka soo gaartay abaar reebtay dacifnimo oo ka dhacday waqooyiga Soomaliya.

ICRC iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay cunto qeybinto bilaabeen Abril 7deed sababta oo ah xaalada oo ka sii xumaaneysay qoysaska la tacaalaya xaaladaha abaarah. Roobabka xilliga Deyrta oo ka hooseeyey sidi la rabay ayaa xaalada ka dhigtag mid xumaata sababatayna in qiiimaha xoolaha hoos u dhac ku yimaado. Tani waxay keentay in hoos u dhaco dakhliga qoyska ku sugar deeganada abaarto ku dhuftay.

"Dhibaatooyinkan waxay sii kordhiyeen nugaantii awalba haysatay dadka ku nool gobol dagaal," sidaa waxaa yiri Raich Curcò,

madaxa ergada ICRC Soomaaliya. "Nasiib xumo, tani ma ahan wax cusub ama waax aan caadi aheyn. Abaarto waa tusalaha uhu dambeyey oo meerto ah cajiibna ah. Wuxaan rajeyna in faragelintaydu ay caawimikarto qaar ka mid ah bulshooyinka waxyeelada gaartay ee sidhiifashinkaas ee abaarta kuu moodhaan."

Bariiska digirta, badarka iyo saliida wax lagu karsado oo laga qeybiyey agagaarka Bari, Nugaal, Sool iyo Sanaag waxaa la filaaya in ay gaarto hal bil, iyagoo si fican ku gaarayaroobabka Gu'ga oo la filaayo inta u dhaxeyso bilaha Abril iyo Juun.

Soomaaliya waxay sanad kasta la kulanta xilliyo qalalan, marka ay qalalaan meelaha biyaha laga helo ceelashana inta badan ay noqdaan isha keliya ee laga helo biyaha. Inta badan, dadka deegaanka waxay ku qasbanyihiin in ay lacag bixiyaan si ay u isticmaalaan ceelasha, iyagoo wada isticmaalaya dhammaan kheyraadkii koobanaa ee qoysaska.

"Sanadkan xilliga jilaalka wuxuu ahaa mid aad u adag," sidaa waxaa yiri Fernando Resta, madaxa mashaariicda biyaha ICRC Soomaaliya. "Hadda biyaha ceelasha aad bay qaal u yihiin. Cunto qeybinteena waxay ka dhigantahay in qoysaskan lacag yar ay ku bixin doonaan cuntada saa darteed waxay awoodi karaan in biyo soo iibsadaan."

Hooyooyin ku sugar barta cunto qeybinta ee gobolka abaarto ku dhufatay ee Sool ayaa raashin ka helay Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas.

Tan iyo sanadkii 2014kii, ICRC waxay gobolada abaarto saameysay ka dhistay 11 ceel, 15 berkado, 10 ceel-gacmeedyo iyo 5 warood oo lagu keydsado biyaha roobka. Sanadkii 2015kii, dad gaaraya 7,800 ayaa wadar ahaan helay 23,000 tallalka geedka timirta si ay ugu xoojiyaan ganacsiga beerta.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya boopo www.blogs.icrc.org/somalia/so

Email: sok_somaliblog_services@icrc.org